loo magdhebo. Waxa kale oo laguu soo celin karaa kharashka kaaga baxa adeegyada daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leeyahay. Soo ogow inaad xaq u leedahay cayiska caafimaadka iyo waxyaalaha kale ee daryeelka bulshada Kela (www.kela.fi).
Dawlada hoose ayaa ka masuul ah bixinta daryeelka bulshada. Waxaad caadiyan heli doontaa xaquuqda adeegyadan hadii xafiiska aad ka diiwaan gashan tahay u ku siyey dawlad hoose oo Finland ku taala. Xawuusnow in goobaha shaqada oo badan ay leeyihiin adeegyada dabiibka shaqada.

Markay dhacdo dhibaato u baahan in degdeg wax looga qabto
Lambarka guud ee la waco markuu dhaco dhib u baahan in degdeg wax looga qabto waa: 112. Lambarkan marka la waco waxaa la helaa ambalaas (baabuurka caafimaadka), booliska iyo dabdemiska.
Hadday jiraan dhibaatooyin xagga caafimaadka maskaxda ah waxaad caawimo ka raadsan kartaa xaruntaada caafimaadka.
Faahfaahin dheeraad ah waxaad kaloo ka heleysaa bogga: www.e-mielenterveys.fi
Adeegga dhibaatooyinka degdegga ah ee ajnebiga loogu talagalay, tel. 09 4135 0501

Warar faahfaahsan waxay ku jiraan internetka
Warar aasaasi ah oo ku saabsan Finland: www.lifeinfinland.fi
Xafiiska Arrimaha U soo Guuridda Waddanka: www.migri.fi
Xafiisyada diwaangelinta: www.maistraattl.fi
Booliska: www.poliisi.fi
Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kela) iyo Adeega shaqada iyo horumarka dhaqalaha www.te-palvelut.fi

Maamulka xoogga shaqada (Työvoimahallinto): www.mol.fi
Bangiga wararka: www.infopankki.fi
Wasaaradda Arrimaha Debedda: www.formin.fi

Wax ka barashada Finland gudeheeda: www.studyinfinland.fi

Khadka adeega bulshada www.suomi.fi
Macuumadka adeega bulshada. www.kansalaisneuvonta.fi
tel. 0295 000

Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto

TYÖ- JA ELINKEINOMINISTERIÖ
ARBETS- OCH NÄRINGSMINISTERIET
MINISTRY OF EMPLOYMENT AND THE ECONOMY

Vipuvoimaa EU:lta
2007–2013

PEFC
PEFC/02-31-135

YMPÄRISTÖMERKKI
MILJÖMÄRKT
441 002
Painotuote

WASAARADDA SHAQADA IYO DHAQAALAHA

Qoraalkan Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa soo saartay sannadkii 2011. Qoraalkan waxa dib loogu xasay wasaarada shaqada iyo dhaqaalaha 2013.

FINLAND KU SOO DHOWOW

WARAR AASAASI AH OO KU SAABSAN FINLAND
Qoraalkan waxaa si kooban loogu soo ururiyey warar loogu talagalay qofka Finland u soo guuraya. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa cinwaanka: www.lifeinfinland.fi

FINLAND U SOO GUURID?
XAGG EE BAAN WAX KA BILAABAA?

Markaad Finland u soo guurto, marka hore dhammayso waxyaabahan:

1. Guri
Raadso guri aad degto. Cinwaan haddii aadan lahayn, isuma diwaangelin kartid inaad tahay qof Finland deggan.

2. Xafiiska diwaangelinta (Maistraatti)
Inaad tahay qof waddanka deggan isaga soo diwaangeli xafiiska diwaangelinta, xafiiskaas baana ku siinaya lambarka aqoonsiga (henkilötunnus).

3. Telefoon
Yeelo telefoonka gacanta, sababtoo ah telefoonnada dadweynaha ee lacagta lagu dirsadaa way yar yihiin. Lacagta deebaajiga ah ayaa ka dhigi karta in qofka ajaanib ahi uuna kontaraag telefoon qaadan karin. Hase yeeshee, waxaad iibsan ka lacagta hore loo sii bixiyo ka iibsan kartaa shirkadaha telefoonka ama dukaanada xaafadaha dhexdooda.

4. Akoon bangi
Akoon ka furo bangiga, sababtoo ah waddanka Finland mushaharka waxaa dadka loogu soo shubaa bangiga. Taageerooyinka lacagta dadka la siiyo, sida lacagta taageerada nolosha oo kale xitaa, qofka waxaa loogu soo shubaa akoonka bangiga. Bangiga si aad akoon uga furato, waxaad u baahan tahay baasaboor ama dukumeenti aqoonsi ah.

5. Hubi inaad xaq u leedhay daryeelka bulshada(Kela-kortti)
Daryelka bulshada ee dadka degan Finlad waxa bixiya hay'ada Kela (Haya'ada caymiska bulshada). Haddaad Finland si joogto ah u deggan tahay waxaad xaq u leedhay caymiska bukaanka. Sida kale ee loo geli karo caymiska bukaanku waa qofku haddii uu shaqeeyo. Mudada ugu yaraan afar bilood ah oo shuruuda ugu yar shaqadana la buuxiyo. Caymiska caafimaadku waa qeyb ka mid ah daryeelka bulshada.

Waxa kale oo aad xaq u yeelan kartaa kabista kale hadii aad haysato daryeelka bulshada ee finishka. Kabistaa waxa ka mid ah kabista qoyska hadii shuruudaha daryeelka la buuxiyo.

Waa inaad adigu Kela ka dalbato xuquuqda daryeelka bulshada. Waxay Kela gaadhi doonta go'aan iyadoo toosna kaadh kuugu soo diri hadii lagu siiyo xuquuqda caymiska caafimaadka.
Waxaad xafiiska Kela weydiisan kartaa ama adeega telefoonka ee Kela. Waxa kale oo aad adigu ka dalban kartaa areegta internedka ee Kela website www.kela.fi.

6. Kaadhka canshuurta
Xafiiska canshuuraha ayaad ka heleysaa kaadhka canshuurta. Mushaharka ama dakhliyada kale ee ku soo gala dartood baad waxaad u baahan tahay kaadhka canshuurta. Kaadhka canshuurta markaad dalbanayso waa inaad haysataa baasaboor ama dukumeenti aqoonsi ah.

7. Shaqo raadsasho
Haddii aadan shaqo haysan, xafiiska shaqada iyo xoogsashada (TE-toimisto = Työ- ja elinkeinotoimisto) ayaad iska diwaangelin kartaa inaad shaqoraadiye tahay. Waddanka Finland qofku markuu shaqo la'aan yahay wuxuu xaq u leeyahay inuu helo badbaadada shaqo la'aanta. Xafiiska shaqada iyo xoogsashadu (TE-toimisto) wuxuu dadka shaqo raadiyayaasha ah u qabanqaabiyaa koorsooyin af Finnish iyo af Iswiidhish ah.

8. Barashada afka
Si dhakhso ah u dalbo koorso af Finnish ama af Iswiidhish ah. Waxaa dhici karta in koorsada saf loogu jiro. Shaqo inaad heshaa way kuu fududaanaysaa, haddii aad afka taqaan. Afka Finnishka iyo Iswiidhishka iskaa xitaa waad isu bari kartaa oo waxaad ka baran kartaa tusaale ahaan internetka bogga www.kotisuomessa.fi.

MA U BAAHAN TAHAY SHARCIGA WADDANKA LAGU JOOGO?

Dadka leh dhalashada Midowga Yurub (EU), dhalasahda waddan ku jira Suuqa Dhaqaalaha Yurub (ETA) ama dhalashada Iswiisarland
Dadka leh dhalashada waddamada Waqooyiga Yurub xaq bay u leeyihiin inay Finland joogaan oo ka shaqaystaan. Hadii aad joogayso wax ka badan (6) lix bilood waa inaad iska diiwaan galiso xafiiska diiwaan galinta degmada. Dadka leh dhalashada waddan ku jira waddamada EU ama ETA ama Iswiisarland iyaguna xaq bay u leeyihiin inay Finland joogaan. Qofka leh dhalasahda waddan ku jira waddamada EU ama ETA ama Iswiisarland, hadduu (3) saddex bilood ka badan Finland joogo waxaa looga baahan yahay inuu iska soo diwaangeliyo saldhigga booliska.

Dadka leh dhalashada waddamo kale oo aan ka mid ahayn waddamada Midowga Yurub (EU) ama waddamada Waqooyiga Yurub
Haddii aad rabto inaad Finland joogto muddo (3) saddex bilood ka badan, waxaad u baahan tahay sharciga waddanka lagu joogo. Sharciga waxaa laga dalbadaa safaaradda ay Finland ku leedahay waddanka aad ka soo tegeyso, Finland gudeheedana sharciga waxaa laga dalbadaa booliska. Haddaad tahay qof waddanka dib ugu soo guuraya sharciga waddanka lagu joogo waxaad heli kartaa, haddii la caddeeyo in asalkaagu Finland ka soo jeedo. Haddii aad Finland ku leedahay qoys ama qof qoyskaaga ah uu joogo, sharci baad ka heli kartaa Finland. Sharciyada waddanka lagu joogo way kala duduwan yihiin, tusaale ahaan waxaa jira sharciyo shaqo ama waxbarasho darteed qofka loo siiyo. Faahfaahin dheeraad ah waxaad weydiin kartaa Xafiiska Arrimaha U Soo Guuridda Waddanka (Maahanmuuttovirasto) (www.migri.fi) iyo booliska (www.poliisi.fi)...

SIDEE AYAA GURI U HELAYAA?

Guryaha kirada ah iyo guryaha la iska leeyahayba waxaad ka raadsan kartaa joornaalka iyo internetka
Guri waxaad ka kiraysan kartaa qof shakhsi ah ama degmada. Markaad guri kiraysanayso waa inaad qolada guriga kaa kiraynaysa si qoraal ah ula gashaa heshiiska kirada oo ay ku qoran yihiin waxyaabaha aad ku heshiiseen ee ku saabsan wakhtiga aad guriga kiro ahaan ugu jireyso iyo caddadka kirada ee aad bixinayso. Waxaa kale oo lagaa rabaa inaad bixiso lacag deebaajiga kirada ah oo u dhiganta ugu badnaan saddex bilood kiradood. Markaad guriga ka guurto ayaa lacagta deebaajiga kirada laguu soo celinayaa.

Xasuusnow!
hubso in lagaaga baahan yahay inaad iska diwaangeliso xafiiska diwaangelinta ama saldhigga booliska si aad u noqoto qof Finland deggan.

Faahfaahin dheeraad ah ka akhriso:
www.asuminen.fi iyo www.lifeinfinland.fi

CAAWIMADA LA QABSASHADA WADDANKA IYO BARASHADA AFKA

Waxaa suuragal kuu ah inaad hesho adeegyo markaad Finland u soo guurto ka dib kaa caawinaya sidii aad waddanka ula qabsan lahayd. Talooyin waxaad ka heleysaa shaqaalaha maamulka dowladda ee degmadaada ama xafiisyada shaqada iyo xoogsashada (TE-toimistot). Waxaa laguu samayn karaa, tusaale ahaan ogaansha xaalka ee hore (alkukartoitus), kaas oo lagu ogaanayo waxyaabaha ku saabsan aqoontaada, xaaladdaada nolosha iyo waxbarashada aad u baahan tahay iyo in loo baahan yahay qorshaha la qabsashada waddanka.
Iyadoo uu ogaanshaha xaalka ee hore sal u yahay baa waxaa laguu samayn karaa qorshaha la qabsahada waddanka.
Qorshaha la qabsashada waddanka ee qofka u gaarka ah waxaa sida caadiga ah ka mid ah waxbarashada afka iyo haddii loo baahdo adeegyo kale. Si loo sugo inaad hesho dhaqaale aad ku noolaato wakhtiga aad ka qaybqaadanayso waxqabad waafaqsan qorshaha la qabsashada waddanka.

DARYEELKA CAAFIMAADKA

Finland waxaa ka jir daryeelka caafimaadka oo dowli ah oo ballaadhan. Tusaale ahaan degmo walba waxaa ku yaalla xarun caafimaad. Adeegyada daryeelka caafimaadka carruurta ee loogu talagalay carruurtu waa lacag la'aan, adeegyada dhakhtarku bixiyo intooda badan lacag la'aan bay u yihiin dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano.
Dadka sida joogtada ah Finland u deggan waxay caadi ahaan ku jiraan caymiska bukaanka ee Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kelan sairausvakuutuksen piiri). Kela macaamiisheedu waxay heli karaan in kharashka daryeelka caafimaadka kaga baxa